

WARBIXIN KU SAHABSAN HAWSHA KA SOCOTA ADOLPH BERGS VEI 31

Laga bilaabo 2 sebtember 2024, waxaa Adolph Bergs vei 31 u soo guuri doona 18 qof, muddo qiyaaskii 6 bilood ah . Dadkani waxay caadiyan deggen yihiin xarunta adeega guriyeynta ee Bjørnsonsgate. Waa guri ay shaqaale joogaan oo loogu talogalay dadka qaba dhibaatooyinka maandooriyaha.

Xarunta adeega guriyeynta ee Bjørnsonsgate, waa lagu sameynayaa dayactir, sidaas darteed dadka halkan deggen waxay ku noolaan doonaan Adolph Bergs vei 31 inta ay socoto muddada dib-udhisku.

Waxaa Adolph Bergs vei 31 ku sugnaan doona labo qof oo ilaalo ah, oo ka socda shirkad ilaalo (vekter), maalin iyo habeen oo dhan (24-ka saacadood). Shaqaale xirfadoodu tahay ta caafimaadka iyo ta arrimaha bulshada ayaa joogi doona xarunta, oo ah goobtoo-da shaqada isniin ilaa jimce, saacaddaha 08.00–15.30 iyo galabaha qaarkood.

Haddii aad wax isweydiineyso ama aad rabto in aad la xiriirto shaqaalahaa Adolph Bergs vei 31, waxaad kala xiriiri kartaa **taleefanka gaadh-ka 40817652** ama e-mail-ka sosiale.botjenester@bergen.kommune.no.

Degmadu waxay sidoo kale hawl gelisay ALF Trivselspatrulje, kuwaas oo diiradda saara bey'adda degaan ee Sletten. Maalmaha shaqada wakhtiyada ay maalinta tahay, waxaa lagala xiriiri karaa lambar taleefan **92403289** ama e-mail trivsel@alf.no.



BERGEN
KOMMUNE